
Talyaaniga

# WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGGAATO SHURUUCDA MAAREYNTA MAGANGELINTA & SOCDAALKA

Nooca A

## CODSADAYAASHA ILAALINTA CAALAMIGA AH




SOMALI

# TUSMADA


| | |
|---|---|
| Maxaad buug-yarahan u heleysaa? | 3 |
| Waa maxay ilaalinta caalamiga ah, yaase heli kara? | 3 |
| Waa maxay Sharciga Maareynta Qaxootiga iyo Socdaalka? | 4 |
| Waa maxay dib u dejin? | - |
| Xuquuqdaada inta aad sugayso go'aanka ku saabsan waddanka EU+ ee baaraya codsigaaga | - |
| Xagee ayaad ku sugnaanaysaa inta aad sugayso go'aanka ku saabsan waddanka EU+ ee baaraya codsigaaga? | - |
| Maxaa lagaaga baahan yahay habraacan? | - |
| Waa kuwee dukumentiyada ay tahay inaad soo bandhigto? | - |
| Maxaad ugu qasban tahay inaad bixiso farahaaga iyo sawirkaaga? | - |
| Waa maxay cawaaqibta ka dhalan kara haddii aadan kasoo bixin waajibaadkaas? | - |
| Maxay ka dhigan tahay xirnaan? | - |
| Sideen ayay hay'aduhu u go'aamiyaan waddanka EU+ ee baaraya codsigaaga? | - |
| Waa lagugu wareysan karaa si loo fahmo waddanka EU+ ee baaraya codsigaaga | - |
| Ma la sameeya wareysiga marwalba | - |
| cadeymo noocee ayaad soo bandhigi kartaa si aad ucadeyso in qoys kuu degan yahay wadan kale oo EU+ ah? | - |
| Intee in la'eg ayay qaadan kartaa? | - |
| Ka waran haddii aad marhore ka codsatay ilaalinta caalamiga ah waddan kale oo EU+ ah? | - |
| Maxaa dhacaya marba hadii goanka la gaaro? | - |
| Waa maxay waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato habraaca racfaanka (marka la isku daro saamaynta hakinta iyo racfaannada maadiga ah) | - |
| Waa maxay waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato habraaca racfaanka (marka saamaynta hakinta iyo racfaannada maadiga ah la kala saaro) | - |
| Xogtee shakhsiyeed ayaa la ururin doonaa? | - |
| Waa maxay xuquuqdaada la xiriirta xogtaada shakhsiyeed? | - |

## MAXAAD BUUG-YARAHAN U HELEYSAA?

Waxaad ka codsatay ilaalin caalami ah (sidoo kale loo yaqaan qaxootinimo) mid ka mid ah 31-ka waddan ee EU+. Tani waxay ka dhigan tahay inaad hadda tahay codsade ilaalin caalami ah. Waxaa suuragal ah in waddan kale oo EU+ ah uu mas'uul ka yahay baarista codsigaaga. Hada waxaad sugaysaa goankaas.

Waxaa muhiim ah in la fahmo sida waddamada EU+ u wada shaqeeyaan maadaama tani ay saameyn karto waddanka baaraya codsigaaga.

Dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah waxaad ka heli doontaa buug-yarahan.

## WAA MAXAY ILAALINTA CAALAMIGA AH YAASE HELI KARA?



Waxa laga yaabaa innaad u baahato ilaalin caalami ah haddii aadan ku laaban karin waddankaaga sababtoo ah waxaad ka baqaysaa cadaadis ama khatar dhab ah oo dhibaato weyn kugu ah. Tani waxay ka dhigan tahay, tusaale ahaan, in noloshaada ama xorriyaddaada ay khatar ku jirto, isla markaana maamulka waddankaagu aanu kaa ilaalin doonin khatarta aad wajahayso.

Waxaad heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta caalamiga ah buug-yare gaar ah.

**Waxaad hadda ku sugan tahay Talyaaniga, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo

4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway, Switzerland.

# WAA MAXAY XEERKA MAAREYNTA MAGANGELINTA IYO SOCDAALKA?




Waddamada EU+ waxay isku raaceen sharci guud oo loogu magac daray Xeerka Maareynta Magangelinta iyo Socdaalka (AMMR). Sharcigan wuxuu ka caawiyaa go’aaminta waddanka mas’uulka ka ah baarista codsigaaga ilaalinta caalamiga ah. Sharcigani sidoo kale wuxuu u oggolaanayaa waddamada EU+ inay iska caawiyaan haddii waddan uu helo codsiyo badan isku mar

Waxaa laguu dammaanad qaadayaa in mid ka mid ah waddamada EU+ uu baari doonpo codsigaaga laakiin ma dooran kartid waddanka EU+ ee mas’uulka ka noqonaya. Waddanka baaraya codsigaaga waxaa go’aaminaya xeerarka sharciga AMMR.

Haddii ay jiraan wax aad ka fahmi waydo buug-yarahan, waxaad weydiin kartaa sarkaal socdaalka ah.



Xilligan, waddamada EU+ waxay kaliya go’aaminayaan midkooda mas’uulka ka ah baarista codsigaaga ama haddii lagaa baahan yahay inaad ku sugnaato waddan kale oo EU+.

Haddii la go'aamiyo in dalka kale oo EU+ ka masuul yahay baadhitaanka codsigaaga, waxaa laguu wareejin doonaa dalkaasi.

## WAA MAXAY DIB U DEJIN?



Mid ka mid ah siyaabaha waddamada Yurub ay iskaga caawin karaan waa iyagoo qaadaya mas'uuliyadda:

- codsadayaasha hadda ku sugan waddan kale oo Yurub ah
- dadka dhawaan la siiyay ilaalin caalami ah waddan kale oo Yurub ah

Tani waxaa loo yaqaan dib u dejin.

Haddii lagugu tixgelinayo wareejinta, waxaad heli doontaa buug-yarahaan oo bixiya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habkan, oo ay ku jiraan waddamada Yurub ee ka qayb qaata wareejinta, kaas oo cinwaankiisu yahay '**Waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato dib u dejinta**'.

**MUHIIM!** Haddii laguu doorto dib u dejinta, ma dooran kartid waddanka laguu wareejinayo.

## XUQUUQAHAAGA INTAAD SUGAYSID GO'AANKA DALKA EU+ AH EE GO'AAMIN DOONA CODSIGAAGA



Haddii aad markii ugu horeysay codsanayso ilaalin caalami ah, waxaad xaq u leedahay **la-talin sharci oo bilaash ah**. Waxaad tan ka codsan kartaa wakhti kasta hay'adaha.

La-taliyaha sharci wuxuu kuu sheegi doonaa xuquuqdaada wuuna ku taageeri doonaa inta habraaca socdo. Haddii aad horey u bixisay lacag si aad u kireysato qareen, hay'aduhu waxaa laga yaaba inaysan ku siin la-talin sharci oo bilaash ah. La-talin sharci waxaa lagu bixin karaa qaab kooxeed, laakiin la-taliyaha ma wadaagi doono macluumaadkaaga gaarka ah dadka kale.

Waxaad codsan kartaa la-taliye sharci adigoo la xiriiraya hay'adaha iyada oo loo marayo Xarunta Booliska (Questura).



Waxaad codsan kartaa turjubaan ama sarkaal kiis ah oo lab ama dhedig ah haddii ay kaaga fududaaneyso inaad ka hadasho xaaladdaada. Hay'aduhu waxay ixtiraami doonaan rabitaankaaga intii suuragal ah.



Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato warbixin ku saabsan horumarka habraaca si loo go'aamiyo waddanka EU+ ee baaraya codsigaaga. Haddii aad rabto inaad codsato warbixin, waxaad la xiriiri kartaa hay'adaha adigoo iimayl u diraya cinwaankan:

unitadublino@pecdlci.interno.it




Waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto oo aad ogeysiiso Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) talaabo kasta oo ka mid ah habraaca qaxootinimo.

UNHCR waxay ilaalisaa danaha iyo xuquuqda dadka codsanaya magangalyada iyo qaxootiga.

Faahfaahinta halka lagala xidhiidhayo UNHCR iyo macluumaadka ku saabsan habraaca magangalyada waxa laga heli karaa wabsaytka UNHCR. https://help.unhcr.org/

**Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad oo ku saabsan taageerada iyo adeeggyada aad heli doonto buug-yare gooni ah.**

## HALKEE AYAAD JOOGI DOONTAA INTAAD SUGAYSID GO'AANKA DALKA EU+ EE BAADHI DOONA CODSIGAAGA?



- Waxaa lagaa rabo inaad ku sugnaato waddankan illaa waqtigaas.
- Waxaa laguu oggol yahay kaliya inaad u safarto dal kale oo EU+ ah haddii maamulku kuu oggolaadaan.
- Haddii masuuliyiintu go'aamiyaan in waddan kale oo EU+ ah uu mas'uul ka yahay baarista codsigaaga, masuuliyiintu waxay kuu diyaarin doonaan safarka waddankaas.

## MAXAA LAGAA FILAYAA ADIGA HABRAACAN?

Waa inaad:

- ✔ Ku sii nagaataa waddankaan inta codsigaaga la diiwaangelinayo.
- ✔ Haddii hore laguu siiyay fiiso ama ogolaansho deganaansho, codso qaxootinimo waddankaas marka aad halkaas timaado.
- ✔ Soo bandhigtaa dhammaan dukumentiyada aqoonsiga si aad u caddeyso aqoonsigaaga.
  Haddii aad hore u haysatay dukumenti aqoonsi laakiin hadda aadan haysan, waa inaad weli u sheegtaa hay'adaha in dowladdu ku siisay mid markii hore.
- ✔ U sheegtaa hay'adaha wakhtiyada aad u safartay waddan kale oo EU+.
- ✔ U sheegtaa hay'adaha haddii aad ku sugneyd waddan EU+ adigoon haysan ogolaansho.
- ✔ U sheegtaa masuuliyiinta qoyskaaga kuu dhow ee ku leedahay waddan kale oo EU+.

**MUHIIM!** Sharcigu wuxuu kugu qasbayaa inaad bixiso farahaaga iyo sawirkaaga.

## DHUKUMENTIYADEE AYAY TAHAY INAAD TUSTID?

La wadaag hay'adaha dhammaan dukumentiyada aad haysato ee ku saabsan:




- aqoonsigaaga (shahaadada dhalashada, baasaboorka, kaarka aqoonsiga)



- xubnaha qoyskaaga ee ku dhow ee ku sugan waddamada EU+ (dukumentiyo rasmi ah, caddaynta inaad xiriir la leedahay)




- joogitaannadii hore ee waddamada EU+ (iyadoo lagu saleynayo ogolaansho deganaansho, fiiso ama si loo helo shahaado dugsi ama jaamacad)

Bixi macluumaadkan sida ugu dhaqsaha badan. Markaad sidan sameyso, waddanka EU+ ee mas'uulka ka ah codsigaaga si dhaqso leh ayaa loo ogaan karaa.

# MAXAAD UGU QASBAN TAHAY INAAD BIXISO FARAHAAGA IYO SAWIRKAAGA?



Hay’adaha waddankan waxay qaadi doonaan farahaaga iyo sawirkaaga. Xogtan, oo ay la socoto macluumaadkaaga aqoonsiga iyo macluumaad kale oo muhiim ah, waxaa loo gudbin doonaa keyd wadaagga Yurub ee loo yaqaan Eurodac.

Keydkan waxaa isticmaala dhammaan 31 waddan oo EU+ ah kuwaas oo ka baaraandegi kara xogtaada si ay u helaan macluumaadkaaga. Haddii aad u guurto waddan kale oo EU+ adigoon haysan ogolaansho oo farahaaga mar kale la qaado, dhammaan xogtaada ku jirta Eurodac waxaa arki doona hay’adaha waddankaas.



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan keydka Eurodac waxaa lagu bixiyaa buug-yare gaar ah.


## WAA MAXAY CAWAAQIBTA KA DHALAN KARTA HADDII AADAN KASOO BIXIN WAAJIBAADYADAAS?



Haddii aadan la shaqeyn hay'adaha, tani waxay saameyn xun ku yeelan doontaa codsigaaga.

Haddii aadan bixin farahaaga, hay'aduhu waxay u qaadan karaan inaadan xiiseynayn qaxootinimada Yurub. Waxay joojin doonaan baarista codsigaaga, taasoo ka dhigan inaadan xaq u lahayn inaad ku sii nagaato waddankaas.

Haddii aad u safarto waddan kale oo EU+ ah adigoon haysan ogolaansho ama aad codsi ilaalin caalami ah ka gudbiso waddan kale oo EU+ ah, waxaa suuragal ah in laguu soo celiyo waddanka EU+ ee mas'uulka ka ah baarista codsigaaga.




Haddii aad ku sugnaato waddan EU+ ah oo aan ahayn midka lagaaga baahan yahay inaad joogto, xorriyaddaada waa la xaddidi karaa, waxaana laga yaabaa inaad hesho taageero yar.

# MAXAY KA DHIGAN TAHAY XIRNAAN?

Xadhig macneheedu waa in lagu geeyo xarun gaara oo aadan si xor ah u socon karin. Masuuliyiintu waa inay haystaan sabab saxa oo ay kugu xidhaan. Waa inay hubiyaan in aan xal kale macquul ah laheyn xaaladaada. Hay'aduhu waxay qiimeyn doonaan xaaladdaada gaarka ah ka hor inta aysan gaarin go'aan. Sababaha laguu xirayo waxay noqon karaan, tusaale ahaan:



- qodobbada muhiimka ah ee codsigaaga magangalyo (tusaale, aqoonsigaaga) lama xaqiijin karo adigoon lagu xirin.
- maad ixtiraamin waajibaadka inaad joogtid goob gaara, waxaana jirta halis ah inaad baxsatid mar kale iyo masuuliyiinta oo aan kula soo xidhiidhi karin
- waxaad heshay go'aan in laguu gudbiyo wadan kale oo EU+ ah kana masuula baadhista codsigaaga magan-galyo waxaana jirta khatar inaad baxsato ah kahor gudbinta
- waxaad keenaysaa halis amni.

Haddii lagu xiro, waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankaas waxaana aad codsan kartaa gargaar sharci oo bilaash ah iyo wakiil sharci.

**MUHIIM !** Haddii aad u safarto waddan kale oo EU+ ah adigoon haysan ogolaansho, waxay kordhinaysaa khatarta in lagu xiro mustaqbalka.

## SIDEE AYAY HAY'ADAHU U GO'AAMIYAAN WADDANKA EU+ EE BAARAYA CODSIGAAGA?

Haddii tani tahay markii ugu horeysay ee aad ka codsato ilaalin caalami ah waddan EU+ ah, waxaa jira dhowr sababood oo waddan gaar ah oo EU+ ah uu mas'uul ka noqon karo baarista codsigaaga.

### 1) Xidhiidhada qoyska



Sababta ugu horreysa uguna muhiimsan waa in xubin qoys oo dhow horey loogu siiyay ilaalin caalami ah ama hadda codsanayaan ilaalin caalami ah waddan kale oo EU+ ah, iyo inaad la midoobto ka hor inta aan codsigaaga ilaalinta caalamiga ah la baarin.

Xubnaha qoyska dhow waxaa loo tixgeliyaa:

- ninkaaga ama xaaskaaga
- lammaanahaaga aan guursan oo aad la wadaagto xiriir deggan
- ilmahaaga (ka yar 18 sano ee aan guursan).

**MUHIIM!** Waa inaad awood u yeelatid inaad sida ugu dhaqsaha badan caddeyso inaad xidhiidh la lahayd qofkaas ka hor inta aadan gelin gobolka waddamada EU+. Mudadaan waxaa ka mid noqon kara safarka aad kaga soo tagtay waddankaaga hooyo.

Haddii aad leedahay xubin qoys oo ku nool waddan kale oo EU+, habka ugu fiican ee macluumaad loo bixin karo waa adigoo buuxinaya foomka loo yaqaan '**family tracing template**'. Haddii aad leedahay xubin qoys oo ku nool waddan kale oo EU+ ah oo aadan weli helin foomkan, la hadal sarkaal ama lataliye sharci. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan buuxinta foomka.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan suurtagalnimada la midoobidda xubnaha qoyska qaybta cinwaankeedu yahay '**Waa maxay caddaynta aad soo bandhigi karto si aad u muujiso in qoyskaagu ku sugan yahay waddan kale oo EU+ ah?**'

## 2) Ogolaanshaha gelitaanka waddan gaar ah oo EU+

Waddan EU+ ayaa mas'uul ka noqon kara baarista codsigaaga haddii:




- aad haysato fiiso ama ogolaansho deganaansho waddan gaar ah oo EU+ ah
- aad gashay waddan EU+ ah oo laguu ogolaaday inaad gasho adoon fiiso haysan sababtoo ah waddankaaga hooyo uu heshiis la leeyahay waddankaas.

## 3) Shahaado waxbarasho ama diblooma



- Waxaa laguu siiyay shahaado ama diploma ka dib markaad si toos ah uga qayb gashay xarun waxbarasho waddan EU+ ah ugu yaraan hal sannad dugsiyeed.

## 4) Gelitaan aan sharci ahayn waddan gaar ah oo EU+ ah

Waddan kale oo EU+ ah ayaa mas'uul ka noqon kara baarista codsigaaga haddii:



- aad ka gudubtay xadka dibadda ee waddan EU+ ah adigoon ogolaansho haysan



- ay kaa soo badbaadiyeen badda hay'adaha waddan EU+ ah inta aad ku jirtay safarkaaga Yurub



- aad ka codsatay ilaalin caalami ah aagga kala gudbinta garoonka diyaaradaha ee mid ka mid ah waddamada EU+.

## 5) La midoobidda daryeele iyo xubin qoys oo ku tiirsan

Waxaad ku tiirsan tahay daryeelka xubin qoys oo ku sugan waddan kale oo EU+ ama xubin qoys oo waddan EU+ ah ayaa ku tiirsan daryeelkaaga.



Xubinta qoyska ee ku tiirsan waxay u baahan kartaa caawimaad sabab ah:

- uur
- ilmo yar ayaa u dhashay
- xanuun maskaxeed ama jidheed oo daran
- naafanimo daran
- dhaawac nafsiyeed oo daran
- da' weyn

Xaaladaha ku tiirsanaanta, waa inaad muujisaa inaad daryeeli karto qofka kugu tiirsan ama in qoyskaaga awood u leeyahay inay ku daryeesho.

## 6) Sababo bini'aadamnimo

Waxaa jiri kara sabab bini'aadamnimo oo waddan gaar ah oo EU+ ah uu baaro codsigaaga. Tani waxay ku salaysnan kartaa:

- arrimaha qoyska
- arrimaha bulshada
- arrimaha dhaqanka

Waddan kale oo EU+ ah ayaa la codsan karaa inuu baaro codsigaaga sababaha kor ku xusan, laakiin go'aanka kama dambaysta ah wuxuu noqon doonaa midka hay'adda waddankaas.

# WAA LAGU WAREYSAN KARAA SI AY GACAN UGA GAYSATO FAHAMIDA DALKA EU+ EE BAADHI DOONA CODSIGAAGA

Haddii tani tahay markii ugu horeysay ee aad codsanayso qaxootinimo, hay'aduhu waa inay abaabulaan wareysi shaqsiyeed.

**MUHIIM!** Tani ma noqon doonto wareysi qaxootinimo. Ujeedada wareysigan waa in la go'aamiyo waddanka EU+ ee baaraya codsigaaga.

**Wareysigan wuxuu leeyahay afar ujeeddo oo waaweyn:**

- in la ururiyo macluumaad ka caawinaya hay'adaha inay go'aamiyaan waddanka EU+ ee mas'uulka ah
- inaad weydiiso wixii su'aalo ah ee ku saabsan sida habraaca go'aaminta waddanka EU+ ee mas'uulka ah loo fuliyo
- inaad weydiiso su'aalo ku saabsan macluumaadka ku jira buug-yarahan
- si laguugu weydiiyo inay jiraan sababo aan laguugu wareejin karin dal kale oo EU+ ah ama sababta aad ugu sii nagaanaysid dalkan.

Wareysigu waxaa lagu qaadi doonaa luuqad aad si fiican u fahmi karto iyadoo la kaashanayo dhexdhexaadiye dhaqameed/turjumaan.



Macluumaad kasta oo aad bixiso lalama wadaagi doono dowladda ama hay'adaha waddankaaga hooyo.

Haddii ay jirto wax aan caddeyn inta lagu jiro wareysiga, waxaad weydiin kartaa su'aalo. Waa idiin muhiim adiga iyo sarkaalka in aad wax walba fahantaan, markaa su'aalaha xad iyo jeer waa la soo dhaweynayaa.



Codka wareysiga waa la duubi doonaa waxaana laguu soo bandhigi doonaa dulmar qoraal ah oo ku saabsan waxa la sheegay.

Ka dib markaad aragto dulmarka qoraalka ah ee wareysigaaga shaqsiyeed, haddii aad u aragto in macluumaadka qaarkood uu khaldan yahay oo aad rabto inaad beddesho, waxaad ka codsan kartaa Questura-da ku wareysatay inay beddesho.

Haddii loo baahdo, waxaad weli bixin kartaa dukumentiyo dheeraad ah ka dib wareysiga ama sababaha aad uga hortagi karto in laguu wareejiyo waddan kale oo EU+.

Haddii aad hayso macluumaad kale ama dukumentiyo kale oo aadan weli u gudbin hay'adaha, waa inaad u gudbisaa isla hay'addii ku wareysatay.

## WAREYSI MAR KASTA MA LA QAADAA?

Haddii tani tahay markaagii koowaad ee aad codsanaysid magangalyo masuuliyiinta ayaa wali dooran kara in aanay qaadin wareysi gaara haddii:

- waddanka EU+ ee mas'uulka ka ah baarista codsigaaga horay loo yaqaano
- horey ay u hayaan macluumaad ku filan oo go'aan ka gaari kara waddanka EU+ ee mas'uulka ah
- horey aad u seegtay wareysi adigoon u sheegayn hay'adaha sababta aadan uga soo qayb-gelin
- aad ku guuldareysatay inaad la xiriirto hay'adaha

Haddii wareysiga aan la qabanqaabin, waxaad codsan kartaa in lagu qabto Questura-da awoodda u leh. Haddii saraakiishu u arkaan inay horey u hayaan macluumaad ku filan si ay kiiskaaga u maareeyaan, way diidi karaan codsiga wareysiga, laakiin waa inay sheegaan sababta.

## CADEYMO NOOCEE AH AYAAD BIXIN KARTAA SI AAD U CADEYSID INAAD KU LEEDAHAY QOYS DAL KALE OO EU+ AH?

Habka ugu fiican ee lagu bixin karo macluumaadka ku saabsan xubin qoyskaaga waa adigoo buuxinaya foomka ‘**family tracing template**’

Intaa waxaa dheer, bixi dhammaan dukumentiyada rasmiga ah ee dowladda oo caddeyn kara xidhiidhkaaga. Waxaad sidoo kale bixin kartaa noocyo kale oo caddayn ah, tusaale ahaan caddaynta muujinaysa inaad xiriir la lahayd xubin qoyskaaga sida sawirro, iimaylo ama farriimo qoraal ah.



Haddii aadan haysan wax caddayn ah oo ku saabsan xidhiidhkaaga, hay’aduhu waxay ku weydiin karaan inaad sameyso tijaabada DNA si aad u caddeyso inaad isku dhiig tihiin.

Waxaad la midoobi kartaa xubin qoyskaaga kaliya haddii labadiinuba qortaan warqad aad ku sheegaysaan inaad rabtaan inaad midoowdaan. Waa inaad isku daydaa inaad dukumentigan ku bixiso Ingiriis haddii aad awoodo.

Billow diyaarinta macluumaadka sida ugu dhakhsaha badan.




Haddii aad qabto su’aalo dheeraad ah ama aad u baahan tahay talo ku saabsan habka la midoobidda qoyska, waxaad ka codsan kartaa caawimaad lataliye sharci.

Haddii aad leedahay xubin qoys oo ku sugan waddan kale oo EU+ ah laakiin aad kala lunteen, waxaa jira ururo kaa caawin kara inaad hesho.

Waxaad la xiriiri kartaa ururadan adigoo adeegsanaya macluumaadka hoose:
OIM [UMCItaly@iom.int](mailto:UMCItaly@iom.int)

CRI [tracing@cri.it](mailto:tracing@cri.it)

## INTEE IN LA'EG AYUU HABRAACU QAADANAYAA?



Isgaarsiinta u dhexeysa waddamada badanaa waxay qaadataa inta u dhexeysa **1 bil iyo bar** illaa **3 bilood**, lakiin tan **waqti dheer ayey qaadan kartaa** iyadoo kuxiran kiiskaaga.



Haddii waddan kale oo EU+ ah xaqiijiyo inuu baarayo codsigaaga, waxaa lagugu wareejin doonaa **6 bilood gudahood** laga billaabo taariikhda ay aqbalaan codsiga wareejintaada.





Haddii codsiga lagu sameeyay sabab ah inaad leedahay xubin qoys oo ku sugan waddan kale oo EU+ wareejinta waxaa **lagu maareyn doonaa mudnaan**



Haddii aad hadda **xiran tahay ama mustaqbalka lagu xiro**, kiis-kaaga waxaa **loola dhaqmi doonaa si degdeg ah**. Wareejintaadu waa in lagu abaabulaa **5 toddobaad gudahood.**. Haddii wareejintu aysan dhicin 5 toddobaad gudahood, waa laga sii deyn doonaa xabsiga. Si kastaba ha ahaatee, wareejintaadu weli waa la qaban doonaa **6 bilood gudahood** laga bilaabo taariikhda uu waddanka EU+ ee mas'uulka ahi aqbalo codsigaaga.

Haddii aad ku jirto xabsi dambigaad ka gashay darteed, muddada wareejinta waxaa **la kordhin karaa ugu badnaan ilaa 1 sano**.




**MUHIIM!** Haddii aad ka baxsato, is qarisid ama aadan la shaqeyn hay'adaha abaabulaya wareejinta, **muddada wareejinta waxaa la kordhin karaa illaa ugu badnaan 3 sano**.

## KA WARAN HADDII AAD MARHOREBA KA CODSATAY ILAALIN CAALAMI AH DALKALE OO EU+ AH?

Waxaad xaq u leedahay inaad magangalyo caalami ah ka codsato hal waddan kaliya oo EU+ ah. Haddii aad marhoreba ka codsatay ilaalin caalami ah dalkale oo EU+ ah, waxa lagugu celin doonaa dalka EU+ ah ee kamasuula baadhista codsigaaga.

Haddii uu jiro macluumaad muujinaya in dal kale oo EU+ ah kamasuul yahay baadhista codsigaaga, ogeysiis ayaa loo diri doonaa dalkaasi. Haddii waddankaas EU+ uu xaqiijiyo inuu baarayo codsigaaga, waxaa laguu soo bandhigi doonaa **go'aan wareejin** oo sheegaya waddanka EU+ ee laguu wareejin doono.

Haddii ay tani tahay markii labaad ee aad codsi ilaalin caalami ah gudbiso ama haddii hore loo go'aamiyay in waddan kale oo EU+ ah uu mas'uul ka yahay, hay'aduhu waxaa laga yaaba inay kaa qaadin wareysi shaqsiyadeed.

Hase yeeshee, waxaad heli doontaa fursad aad ku sharraxdo sababta aan laguugu wareejin karin waddankaas ama sababta laguu oggolaan karo inaad ku sii nagaato waddankan.

Waxaad macluumaadkan u gudbin kartaa sidan: qoraal ahaan ama af ahaan hay'adaha awoodda u leh (Xarunta Booliska).

## MAXAA DHACAYA MARKA GO'AANKA LA GAADHO?

Haddii laguu soo saaro go’aan wareejin si laguu raro waddan kale oo EU+, qaar ka mid ah xuquuqdaada waa la joojin doonaa, tusaale ahaan:

- ma **heli doontid adeeggyo badan iyo noocyo taageero ah**
- laguuma **oggolaan doono inaad shaqeysid** ama **lasocotid casharada**.





Wareejinta waa in lagu fuliyaa muddo 6 bilood ah laga bilaabo taariikhda uu waddanka EU+ xaqiijiyay ama aqbalay inuu baaro codsigaaga

Haddii lagugu xiro, kiiskaaga si degdeg ah ayaa loo maareyn doonaa. Wareejinta waa in lagu habeeyaa 5 todobaad gudahood. Haddii wareejintu aysan dhicin 5 toddobaad gudahood, waa lagaa sii deyn doonaa xabsiga.

Wareejinta weli waa la qorsheynayaa 6 bilood gudahood laga bilaabo taariikhda dalka EU+ ee mas'uulka ah uu aqbalay codsiga wareejinta.

Haddii aad ku jirto xabsi dambigaad ka gashay darteed, muddada wareejinta waxaa la kordhin karaa ugu badnaan ilaa 1 sano,

**MUHIIM!** Haddii aad ka baxsato ama aadan la shaqeyn hay’adaha abaabulaya wareejinta, **muddada wareejinta waxaa la kordhin karaa illaa ugu badnaan 3 sano**.

## MAXAA DHICI DOONA HADDII AADAN RAALI KA AHAYN GO’AANKA WAREEJINTA?



Haddii la go'aamiyo in dal kale oo EU+ ah uu mas'uul ka yahay baarista codsigaaga, waxaad heli doontaa **go'aan ku saabsan ka wareejinta.** Go'aankani wuxuu kuu sheegi doonaa dalka laguu wareejin doono.

Haddii aad ka soo horjeedo go'aanka wareejinta, waxaad maxkamadda u gudbin kartaa sababahaaga. Kani waxaa la yiraahdaa racfaan. Marka aad racfaan gudbiso, maxkamad ama guddiga garsoorka ayaa samayn doona go'aanka kama dambaysta ah.

Waxaa jira saddex sabab oo kaliya oo lagu codsan karo go'aanka wareejinta:

- waxaad sheegaysaa in ay ka hor imaaneyso xuquuqdaada aadanaha haddii laguu wareejiyo dalkaas EU+ ka ah.
- waxaa jirta macluumaad cusub oo aan la heli karin waqtiga go’aanka wareejinta, kaas oo saameyn lahaa go’aankaas.
- qoyskaaga ayaa jooga dal kale oo EU+ ah oo aad rabto in lagula midoobiyo badalkeed.



Haddii aadan awoodin inaad sameysato qareen kuu gaar ah, waxaa lagu siin doonaa qareen kaa caawiya racfaanka adigoon wax kharash ah bixin.

Inta lagu jiro habkan, waxaad heli doontaa turjubaan kugu hadla luqad aad fahmi karto.

## WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO HABRAACA RACFAANKA (MARKA SAAMAYNTA HAKINTA IYO RACFAANNADA MAADIGA AH LA KALA SAARO)

Xadidida waqtiga, meesha iyo sida loo gudbiyo racfaanka waxaa lagu sharxi doonaa go'aanka wareejinta ee lagu siiyay.

Waa inaad sheegtaa sababta ama sababaha aad uga soo horjeedo go'aanka laguu wareejinayo dal kale oo EU+ ah.

Waa inaad sheegtaa sababta ama sababaha aan laguugu wareejinayn dalka EU+ ah ee u xilsaaran baaritaanka codsigaaga inta racfaankaaga lagu jiro.

Maxkamadda ayaa marka hore go'aamin doonta haddii aad sii joogi karto waddankan inta laga sugayo natiijada racfaanka, muddadaas oo socon karta ilaa **1 bil.**. Tani waxaa loo yaqaan racfaanka leh saamaynta joojinta

Haddii maxkamaddu go'aansato inaadan sii joogin waddankan inta natiijada racfaanka la sugayo, waxaa lagugu wareejin doonaa dalka EU+ ee mas'uulka ka ah baaritaanka codsigaaga.

Haddii maxkamaddu go'aansato in laguu ogolaado inaad sii joogto waddankan inta racfaanka la sugayo, maxkamaddu waxay isku dayi doontaa inay go'aan kama dambays ah ka gaarto 1 bil gudahood laga bilaabo taariikhda go'aanka saamaynta joojinta.

Haddii racfaankaaga la diido, waxaa laguu wareejin doonaa dalka EU+ ee mas'uulka ka ah baaritaanka codsigaaga. Wareejinta waa in la sameeyaa 6 bilood gudahood laga billaabo taariikhda go’aanka kama dambaysta ah.

Haddii aad hadda xiran tahay ama mustaqbalka lagugu xiro xabsi, kiiskaaga waxaa loo tirin doonaa mid degdeg ah. Wareejinta waa in lagu habeeyaa 5 todobaad gudahood. Haddii wareejinta aan lagu samaynin 5 todobaad gudahood, waxaa lagaa sii dayn doonaa xabsiga. Hase yeeshee, wareejinta weli waa la qorsheynayaa 6 bilood gudahood laga billaabo taariikhda dalka EU+ ee mas'uulka ah uu aqbalay codsiga wareejinta.

**MUHIIM!** Waa inaad la shaqeyso maamulka oo aad u safartaa wadanka EU+ ka ah ee baaritaanka codsigaaga mas’uulka ka ah.

## XOG GAARA OO NOOCEE AH AYAA LA URURIN DOONAA?



Shaqaalaha ku sugan dalka EU+ ee aad joogto waxay ururin doonaan macluumaad gaar ah oo ay ka mid yihiin:

- Faahfaahintaada gaarka ah iyo kuwa xubnaha qoyska kula socda (magaca, dhalashada, taarikhda iyo goobta aad ku dhalatay). Haddii aad hore u isticmaashay magacyo ama faahfaahin kale oo kala duwan, way ku weydiin doonaan.
- Macluumaadka ku saabsan aqoonsigaaga iyo dukumiintiyada safarka.
- Macluumaad kale oo xaqiijin kara aqoonsigaaga, sida farahaaga.
- Faahfaahinta xubnaha qoyskaaga ee ku nool dal kale oo EU+ ah (faahfaahinta gaarka ah, xiriirka ugu dambeeyay, halka ay joogaan, iyo xaaladdooda sharci).
- Faahfaahinta dukumiintiyada kuu suurtageliyay inaad ku noolaato dal EU+ ah haddii ay ku khuseyso.
- Macluumaadka dukumiintiyada muujinaya inaad wax ku baratay dal EU+ ah muddo ka badan hal sano.
- Macluumaadka ku saabsan dalalkii aad soo martay si aad usoo gaarto waddankan.
- Xaaladahaga shaqsiyeed.
- Taariikhda codsiyadii hore ee aad u gudbisay ilaalinta caalamiga ah iyo natiijadii ka soo baxday codsiyadaas.

## WAA MAXAY XUQUUQDAADA LA XIRIIRTA XOGTAADA SHAKHSIYEED?

Waxaad xaq u leedahay inaad aragto dhammaan xogta aad u gudbisay maamulka.

Haddii aad aaminsan tahay in qaar ka mid ah xogtaada shakhsiyeed ay khaldan tahay ama si aan sharci ahayn loo farsameeyay, waxaad codsan kartaa inaad aragto xogtaada adigoo la xiriiraya maamulaha xogta si aad u weydiisato in xogta khaldan la saxo ama xogta si sharci darro ah loo farsameeyay la tirtiro.

Waxaad la xiriiri kartaa maamulaha xogta ee waddankaan adoo adeegsanaya macluumaadka hoose.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuro xuquuq ama waajibaad Hay’adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa bixisay qaybta ugu weyn ee agabkan, waxaana EUAA kaliya oggolaatay in la nuqulo ama wax laga beddelo buug-yarahan Waddamada Xubnaha ka ah EU. EUAA ma qaado wax mas’uuliyada ama xil ku saabsan saxsanaanta, nuxurka, dhameystirnaanta, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay bixiyeen Waddamada Xubnaha ka ah EU ama dhinac saddexaad oo mas’uul ah. EUAA iyo cid kasta oo ku shaqaysa magaca EUAA midna mas’uul kama aha isticmaalka laga yaabo in laga sameeyo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Hay’adda Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025